# Warqada tagista Dugsiga/skoolka caruurta

Waxaad ku cusub tahay magaalada Halle saale ama aad usoo guurtay?
Markaas waxaa ku horyaala shuruudahan inaad buuxiso ku saabsan waxbarashada dugsiga caruurta, halkan waxaa yaala suaalaha kugu imaan doono iyo jawaabohooda:

## Ilmahaaga waxa uu gaadhay 5 shan sano jir waxaana la rabaa ama ay tahay sanadka dambe inuu dugsiga aado, (maxaad samayn kartaa)?

Dhamaan caruurta sanadka bishiisa lixaad 30 keeda ama dhamaadkeeda ugu buuxdo lixsano jir (6sano) waxaa waajib ku ah inay aadaan dugsiga hoose ee caruurta ama ay bilaabaan, (Grundschule). Waxa ay ku xiran tahay meesha ama dugsiga kuugu dhow inaad raadiso ama caruurta gayn karto taasna waxaad ka eegaysaa am aka heli kartaa macluumaad dheeraad ah www.halle.de kaasoo qaabilsan ama aad ka heli karto meesha aad dagan tahay ama dugsiga kuugu dhow aad caruurta gayn karto ama aad iska xaadirin karto dalabkaagana u dirsan karto mudo sanad iyo bar kahor (1.5 kahor) waqtiga aad caruurta dugsiga gaynayso.
Taas waxaad ka ogaanaysaa warqadan ama dowladda ama dugsiga qaabilsan hadii aad xiriir la samaysay.
Ka hor tagista ilmaha ee dugsiga ama gaynta aad gaynaysowaxaa jira baaritaan caafimaad oo qaybta wasaarada caafimaadka ee ilmaha qaabilsan ku sameeyaan ardayga ama ilmaha kahor inta aanuu dugsiga bilaabin kahor.
Balanta caafimaadka iyo barista waxaad ka heli kartaa xarumahan caawinta oo aan kuugu qori doono baydka ama boga labaad ee warqadda.

## Waxaa jira laba mid oo kala ah ilmahaaga hadii uu hore u aaday dugsiga hoose dalkan jarmalka meel ka mid iyo in aanuu aadin:

Hadii ilmahaaga uu dugsi hore aaday oo ay tahay inuu sii wado waxaad ka raadinaysaa dugsiga cusub www.halle.de.

## Ilmaha hore dugsiga wadan uma aanuu aadin, waxaad samayn kartaa:

Ugu horayn waa inaad hesho cadayn caafimaad oo ah in ilmaha baaritaan caafimaad lasoo marsiiyay. Taasna waxaad ka helaysaa sidaan kuusoo sheegay ciwaanada hoos iyo bogga labaad ku qoran oo aad la xiriirayso si ay kaaga caawiyaan in ilmaha uu baaritaan caafimaad iyo balan ka helo xarunta qaabilsan baaritaankan:

Beratungsstelle I, Helmeweg 2, 06122 Halle (Saale), Telefon: 0345 685 6742
Stadtbereich: Nord, nördliche Innenstadt

Beratungsstelle II, Helmeweg 2, 06122 Halle (Saale), Telefon: 0345 690 2683
Stadtbereich: West

Beratungsstelle III, Stendaler Straße 7, 06132 Halle (Saale), Telefon: 0345 770 4766
Stadtbereich: Süd

Beratungsstelle IV, Niemeyerstraße 1, 06110 Halle (Saale), Telefon: 0345 221 3241
Stadtbereich: Innenstadt, Ost

Beratungsstelle V, Helmeweg 2, 06122 Halle (Saale), Telefon: 0345 685 6742
Stadtbereich: West

Warqadda cadayta caafimaadka ilmaha sida sharciyan ah ay soo xaqiijiyeen goobta ilmaha lagusoo baaray waxaad gaynaysaa ama udhiibaysaa qaybta maamulka dugsia ee qaabilsan qoritaanka ilmaha iyo fariisinta iyadoo ay la socoto warqada daganaanshaha magaalada ee loo yaqaan (Meldebescheinigung). Kadib waxaa lagu dirayaa waraaqaha email ahaan ama post ahaan waxaanay tagaysaa laanta wasaarada waxbarashada oo loo yaqaan (Landesschulamt), waxaana aad helaysaa jawaab kuugu imaan doonta sanduuqa post.

**Ilmahayguwaxa uguu dugsia aaday fasalka 5aad ilaa fasalka 10aad, side ugu heli karaa sii wadis ama wax lamid ah waxbarashada inuu sii wadi karo?**

Waxaad samayn kartaa in ilamhaaga aad usii wado waxbarashada oo aad raadiso dugsiga loo yaqaan (Gymnasium) ama dugsiyada ka sii sareeya ilaa uu ka gaaadhi karo heerar kala duwan sida ilaa fasalka 12aad ama heerka loo yaqaan (Abitur).
Waxaa kaa caawi kara sii wadista inaad ka raadiso www.halle.de oo kuu sahlaya inaad uhesho ilmaha dugsi uu sii wado karo.
Dugsiga hoose dhexe ama loo yaqaan (Sekundarschulen) u gudbistiisa iyo sii wadista ilaa dugsiga sare (haup iyo realschule) si aad u hesho waxaad kala xiriiraysaa dugsiga degmadaada ee qaabilsan ama kuugu dhow.

### Muddo intee ah ayuu ilmaha dugsiga tagayaa ama tahay in uu aado?

Gobolka sachsen anhalt waxa uu ilmaha ku qasban yahay inuu dugsiga aado ugu yaraan 9 sanadood ugu badnaanna 12 sanadood.

### Ma qasab ama waajib baa in ilmaha uu dugsiga aado?

Haa. Ilmaha wuu ku qasban yahay inuu aado dugsiga marka laga reebo xaaladahan soo socda: hadii hooyada dhashay ilmaha ay tahay kaligeed oo uu dhasho ilmo cusub xaaladeedana aanay awoodin inay isku wado ilmaha dhashay iyo kann dugsiga la gaynayo taas waxay ka dhigan tahay hadii xaaladaas iyo wixii la mid ah jiraan waxaa goaaminaya hooyada dhashay ilmaha iyo wasaarada waxbarashada ama laanta qaabilsan ee loo yaqaan Landesschulamt (Lscha-Poststelle@Sachsen-Anhalt.de, Tel.: 0345 5140).

Maamulka magaalada halle way xaqiijinayaan dhamaan wixii ku saabsan tagista dugsiga ee ilmaha qofkii kasoo horjeesta arimahaas waxaa la marin doonaa xeerka qabanaya.

Hadii aad wax suaal ah ka qabto arimahan dugsiga iyo waxbarashada waxaad nagala soo xidhiidhaysaa bartan hoos ku qoran.

Fachbereich Bildung
Abteilung Schule
Albert-Schweitzer-Str. 40
06114 Halle (Saale)
Tel.: 0345 / 221 3131 oder 3141

E-Mail: schulverwaltung@halle.de

Hadii aad qabto wax suaal ah oo kale ama suaalo dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada waxaad la xidhiidhi kartaa ama tagi kartaa meelaha caawinta qoxoontiga iyo dadka cusub sida ciwaanka shabakada hoos ku qoran oo aad ku raadin karto sida ay u qoran tahay.

https://www.nemsa.de/infothek-wissen/elterninformationen-mehrsprachig/

waxaan kuu rajaynaynaa nasiib wanaagsan iyo guul xaga waxbarashada iyo waxa ku saabsan.